

# Natijada GUDBISTA:

## Ogaysiinta Natijada Baadhista Maqalka

Barnaamijka Baadhista  
Dhawaan-dhaladka  
Minnesota



## Ilmahaagu wuu gudbay baadhista maqalka.

Fadlan u keen xaashidan bixiyaha koowaad ee daryeelka ilmahaaga booqashadaada ilme ee u horraysa.

Feejignaanta Bixiyaha Koowaad ee Daryeelka (ATTN: Primary Care Provider): \_\_\_\_\_

Rugta (Clinic): \_\_\_\_\_

Magaca Ilmaha (Baby's Name): \_\_\_\_\_

Taariikhda Dhalashada Ilmaha (Baby's Date of Birth): \_\_\_\_\_

Barta Cusbitaalka/Dhalmada (Hospital/Birth Site): \_\_\_\_\_

Taariikda Baadhistii Maqalka ee u Dambaysay (Date of Last Hearing Screen): \_\_\_\_\_

Dhagta Midig (Right Ear):  GUDBISTA (PASS)

Dhegta Bidix (Left Ear):  GUDBISTA (PASS)

Waa yar tahay in ilmahaagu uu qabo maqal beel wakhtigan.  
Hase yeeshee, waa kuwan dhawr shay oo ay tahay in la xasuusnaado!

1

Ilmahaagu waa gudbay baadhista maqalka, laakiin waxa muhiim ah in la ogaado in ay jiri karaan isbeddelo maqalka wakhti kasta carruurnimada.

2

Hadalka iyo luuqaddu waxay bilaabaan inay koraan dhalashada, in kastoo carruurta inta badan ayna hadlin ilaa hal sano jir ay gaadhaan. Aqoonsiga maqal beelka ee xilli hore waxay muhiim u tahay hubinta carruurta inay haystaan waxqabadyo iyo taageerada ay u baahan yahay si ay si caafimaad qabta u koraan.

3

Haddii aad u malaynayso ilmahaagu inaanu si fiican wax u maqlayn mustaqbalka, la xidhiidh rugtaada caafimaadka ama bixiyaha koowaad ee daryeelka. Macluumaadka dhinaca kale ee xaashidan waxay kaa caawin doontaa inaad ogaato sida dabecadaha maqalka iyo hadalka ee ilmahaaga loogala socdo horumarka.



# Macluumaadka Waalidka: Maqalka Ilmahaaga

Maqalku waa isbeddeli karaa wakhti kasta. La hadal bixiyaha koowaad ee daryeelka ilmahaaga haddii wax liiska hoose kujira uu yeesho ilmahaagu hadda ama mustaqbalka ah:

1. Waalidka ama xubin qoys oo dhow oo kale ayaa leh maqal beelay markii uu yaraa
2. Ilmahaaga ayaa ku sugnaa NICU in kabadan shan maalmood
3. Ilmahaaga ayaa maray dhiig ku shubis
4. Ilmahaaga oo yeeshay/leh infakshano dhageed oo badan
5. Ilmahaaga oo lahaa ama leh dhaawac madaxa ah
6. Uma malaynaysid ilmahaagu inuu si fiican wax u maqalyo
7. Uma malaynaysid ilmahaagu inuu si fiican u hadlayo
8. Habdhaqanka ilmahaagu waa ka duwan yahay **LIISKA MAQALKA**

Ma ogtahay?

**50%**

carruurta maqalka beelaa ma leh qodob halis



## Maqalku waa isbeddeli karaa.

Kala soco isbeddelada koboceed ee ilmahaaga liiska maqalka!

### 0-3 bilood

- ✓ Wuu sasaa ama wuu ka ooyaa qaylada dheer
- ✓ Ku degaa codad uu garanayo
- ✓ Dhaqaaqaa ama ku toosa hadalka qofka

### 3-6 bilood

- ✓ Hadaaqa, oo sameeya codad kale duwan
- ✓ U jeesta dhinaca codadka ama jabaqaha sare
- ✓ Ku raaxaysta shagax-shagaxda ama toyiska kale ee codka sameeya

### 6-12 bilood

- ✓ Bilaaba inuu ku daydo codadka hadalka (baba, mama)
- ✓ Fahma “maya” ama “bay-baay”
- ✓ Bilaaba inuu madaxa u leexiyo dhinaca codadka dabacdasan
- ✓ Eega walxaha uu yaqaano marka la magacaabo

### 12-18 bilood

- ✓ Si degdeg ah u jeedsada dhinaca jabaq kasta
- ✓ Aqoonsada magaca oo fahma qiyaastii 50 eray
- ✓ Ka soo dhaqaaqa dhihista 2 eray ilaa 10 eray
- ✓ Raaca tilmaamaha sahlan (“mee kubaddaadii”)

### 18-24 bilood

- ✓ Ku raaxaysta in wax loo akhriyo
- ✓ Tilmaamaha qaybaha jidhka marka la waydiiyo
- ✓ Bilaaba inuu isku xidho erayada (“caano dheeraad ah”)
- ✓ Dhaha 20-50 eray oo fahma intaas in kabadan

**LIISKA MAQALKA**